



dadoow, Ilaahay ayaa idinka bixiyey kibirkii jaahiliyada, iyo ku faanideedii Aabayaashood

Ibnu Cumar Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiye waxaa laga wariyeye: Rasuulka Ilaahay scw dadka ayuu u khudbeeyey maalintii Makah la furay, wuxuuna yiri: "dadoow, Ilaahay ayaa idinka bixiyey kibirkii jaahiliyada, iyo ku faanideedii Aabayaashood, dadku waa laba qof uun: mid baari ah oo taqi ah, Ilaahayna kariim ku ah, iyo mid faajir ah oo hooge ah, oo aan Ilaahay qiimo la lahayn, dadku waa ilma Nabi Adam cs, Adamna ciidaa Ilaahay ka abuuray, Ilaahay wuxuu yiri: { dadoow, waxaan idinka abuuray lab iyo dhadig, waxaana idinka yeelay shucuub iyo qabiilo, si aad isku aqoonsataan, Ilaahay xagiisana waxaa ugu qiimo badan kan idiinku taqwada badan, Ilaahay waa kii cilmi badan oo khibrad badan} [Al xujuraat:13]).

[Xadiis Saxiix ah] [waxaa wariyey tirmidi iyo ibn xibbaan]

Nabigaa scw wuxuu u khudbeeyey dadka maalinta makah la furay, wuxuuna yiri: dadow, Ilaahay ayaa idinka kor qaaday oo idinka bixiyey kibirkii jaahiliyada iyo islawaynideedii iyo iskugu faanidii aabayaasha, dadku waa labo nuuc uun: Waa mid muumin baari ah taqina ah oo Ilaahay casa wajala adeecay caabudayna, kaasi Ilaahay kariim ayuu ku yahay, yuuba ahaane mid sharaf iyo nasab dadka ku dhex lehe. iyo mid gaal faajir ah oo hooge ah, kaasina Ilaahay xagiisa wuxuu ka yahay mid aan qiimo lahayn oo duli ah oo aan waxba ahayn, haba haado mid nasab ama waji iyo saldano lehe. Dadka dhamaantood waa ubadkii Adam, Adamna Ilaahay wuxuu ka abuuray ciid, kuma haboona mid asalkii laga abuuray ciid inuu kibro oo uu is cajabiyo, waxaana u daliil ah qawlka Ilaaay casa wajala yiri: {dadoow anagaa idinka abuuray lab iyo dhadig, waxaanan idinka yeelnay shucuub iyo qabiilo, si aad isku garataan, xaga Ilaahay waxaa idiinku karaamo badan kan idiinku taqwo badan, Ilaahay waa cilmi badane khibrad badan.} [al-xujuraat:13].

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65074>

